Ku dhaqan Xafiis D.

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

# OFFICIAL BULLETIN

## EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

**Sanadka 13aad** **Muqdisho, 05 APRIL 2026** **Lr.1**

**Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah**
**Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda**

## FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

**SHARCI**

W.M

## BOGGA LABAAD

XEER

## BOGGA SEDDEXAAD

**TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM**

# BILAHA

# JAN-FEB

# 2026

**Tixraac: XRW/ 544 /01/2026** **Taariikh: 11 /01/2026**

**Ku: Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka** **Muqdisho**
**Og: Dhamman Xubnaha Golaha Wasiirrada** **Muqdisho**
**Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed** **Muqdisho**

**UJEEDO: GO'AAN GOLE EE "ANSIXINTA SIYAASADDA QARAN EE NAAFADA SOOMAALIYEED"**

XRW - BIXIT
18 JAN 2026
OPM - EXIT

**Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;**

**Markuu arkay:** Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (i); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

**Markuu arkay:** Warqada Summadeedu tahay **WQHI&/XWD/28/2025**, ku taariikhaysan 03/12/2025, kuna saabsan codsi soojeedinta Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed;

**Markuu arkay:** Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.01.26** ee **05/01/2026**, kuna saabsan Ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed "** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

**Markuu tixgaliyay:** Muhiimadda ay u leedahay in ay dadka naafada si buuxda ugu faa'iideysantaan adeegyada bulshada uguna mid noqondaan horumarka Dalka.

**Waxaa uu meelmariyay:**

**Qodobka 1aad:**

**Go'aan Gole**

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.01.141.01.26** ee **05/01/2026**, kuna saabsan Ansixinta **"Siyaasadda Qaran ee Nafaada Soomaaliyeed"** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

## Qodobka 2aad

### Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuuqul Insaanka loo igmaday inay hirgaliso, meelmarisana Siyaasaddan kor ku xusan.

## Qodobka 3aad

### Dhaqangal

Siyaasaddan waxaa ay dhaqangalayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

**Mudane, Saalax Axmed Jaamac**
**Ku simaha Ra'iisul Wasaaraha ahna**
**Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka Xukuumadda JFS**

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HaN-007-2026
TAARIIKH: 31-01-2026
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

2025

# JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
# WASAARADDA QOYSKA IYO HORUMARINTA XUQUUQUL INSAANKA

# SIYAASADDA QARAN EE NAAFADA SOOMAALIYEED

***Waxaa diyaariyay: Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka***

## SOO KOOBID

Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waa tallaabo istaraatiiji ah oo lagu doonayo in lagu dhiso bulsho dhammeystiran oo iswadata, una siman xuquuqda aasaasiga ah, taasoo awoodsiinaysa dadka naafada ah, sidii ay qeyb uga noqon lahaayeen dhammaan dhinacyada horumarka Qaranka. Siyaasaddan waxaa asaas u ah mabaadi'da sinnaanta, takoor la'aanta iyo si fudud u helidda adeegyada bulshada, waxayna sidoo kale ku tiirsan tahay ballanqaadyada Dastuurka Soomaaliya, sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada iyo waajibaadka caalamiga ah ee ka saaran fulinta Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Dadka Naafada ah.

Dadka Naafada Soomaaliyeed waxay wajahaan caqabado joogto ah sida takoorid bulsho, helitaan la'aanta adeegyada muhiimka ah sida waxbarashada, daryeelka caafimaadka, shaqo-abuurka iyo kaabeyaasha la adeegsado. Arrimahan waxaa sii xoojiyay colaado soo noqnoqday iyo musiibooyin dabiici ah oo keenay in naafadu sii ahaadaan qayb si gaar ah loo gacan bidixeeyo. Siyaasaddan waxay si cad u wajaheysaa baahida loo qabo in la jebiyo caqabadahaas, iyadoo mudnaanta siineysa aqbalaadda, xaqsiinta, iyo ka mid noqoshada naafada ee horumarka Qaran.

Siyaasadda aragtideedu waa u damqanaysa dadka naafada ah, una aqoonsan xuquuqdooda isla markaasna ka dhiga ka qayb-galayaal firfircoon nolosha dhaqaale, bulsho, iyo siyaasadeed. Ujeeddooyinka Siyaasadda waxaa kamid ah: ilaalinta iyo kobcinta xuquuqda naafada, iyadoo loo marayo xoojinta hannaanka sharci, kor-u-qaadidda helidda waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo shaqo-abuurka xoojinta ka-mid noqoshada naafada ee hay'adaha Dowladda sida xukuumadda iyo golayaasha go'aan-qaadashada awoodsiinta dhaqaale iyadoo loo marayo tababarro xirfadeed iyo hal-abuurro ganacsi iyo kor-u-qaadidda wacyiga bulshada si loola dagaallamo takoorka naafada uga imaaneyso xagga bulshada loona fahmo xuquuqda naafada.

Si loo xaqiijiyo ujeeddooyinkan, siyaasaddu waxay xoogga saareysaa xoojinta shuruucda la xiriira taabba-gelinta xuquuqda dadka naafada ah iyo dhisidda qaab-dhismeed sharciyeed oo ay hormuud u tahay Hay'adda Naafada Qaranka Soomaaliyeed oo ah hay'adda u xilsaaran arrimaha naafada. Ujeeddadu waa in naafadu si buuxda uga faa'iideystaan adeegyada bulshada, kana mid noqdaan horumarka Dalka. Hawlahan waxaa hirgelinaya Hay'adda Naafada Qaranka, iyadoo warbixin laga siinayo Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Xuquuqul Insaanka.

Ka-qaybgalka naafada ee siyaasadda waa tiir muhiim ah si ay u helaan matalaad dhab ah oo ku saabsan maamulka iyo go'aan-qaadashada. Barnaamijyada cadaaladda waa in loo qaabeeyaa si siman si ay ugu faa'iideystaan naafada, loona abuuro nidaam caddaaladeed

oo ay ku helaan taageero sharci oo xaqiijinaysa xuquuqdooda.

Fulinta siyaasaddan waxay yeelanaysaa dhawr waji, sida ujeeddooyinka waqtiga dhaw, kuwa dhexe iyo kuwa fog, taasoo la jaan-qaadi karta xaaladda bulsho iyo dhaqaale ee Soomaaliya. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa muhiimadda ay leedahay iskaashiga dhexmara hay'adaha Dowladda, bulshada rayidka ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay, saaxiibbada caalamka iyo guud ahaan bulshoweynta Soomaaliyeed, si loo xaqiijiyo ujeeddooyinka Siyaasaddan.

Dadka Naafada ah iyo ururradooda waxay udub-dhexaad u yihiin qorsheynta hannaanka fulinta iyo qiimeynta si loo xaqiijiyo in codkooda la maqlay, baahiyahoodana la fuliyay.

Si loo dammaanad-qaado in Siyaasaddu ay tahay mid waxtar leh oo ka jawaabaysa baahiyaha dadka naafada, waa in la helaa qaab-dhismeed leh tilmaamaha guusha iyo hannaan isla-xisaabtan oo cad. Warbixinnada joogtada ah, qiimeynta bulshada iyo kormeer in laga wada qeyb-qaadanayo waxay keenayaan horumar joogto ah oo laga gaaro xuquuqda dadka naafada ah. Sidoo kale, dejinta istiraatiijiyadaha maal-gelinta joogtada ah sida qoondada misaaniyadda xukuumadda iyo dhaqaale-aruurinta bulshada oo leh hannaan maaliyadeed oo hufan waxay dammaanad-qaadayaan guusha hirgelinta Siyaasadda.

Siyaasaddani waxay ka dhigantahay geeddi-socodka isbeddelka, si loo helo Soomaaliya ay u dhanyihiin bulshadeedu. Aragtidan hiigsiga leh waxay ku baaqaysaa in dhammaan dhinacyada ay khusayso ay u midoobaan, xooggooda iskugu geeyaan isla markaasna la yimaaddaan dadaallo hal-abuur leh, si loo abuuro Qaran loo dhanyhay oo aan cidina laga tagayn.

**H.E. Amb. Khadiija Maxamed Almakhzuumi**
**Wasiirka, Wasaaradda Qoyska iyo Hormarinta Xuquuqul Insaanka, Xukuumadda JFS**

# 1. SOOYAAL IYO HORDHAC

## 1.1 Sooyaal

Naafada Soomaaliyeed waxay muddo dheer la daala-dhacaysay xaalado adag oo kahor istaagay in ay si buuxda qeyb uga noqdaan nolosha bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda Dalka. Naafadu waxay ka mid tahay qaybaha ugu nugul bulshada, waxayna in badan wajahaan takoor joogto ah oo ka go'doomiyay bulshada inteeda kale. Nuglaantaasi waxay si toos ah saameyn ugu yeelatay awooddooda ay ku heli lahaayeen adeegyada asaasiga ah sida waxbarashada, daryeelka caafimaadka iyo fursadaha shaqo, kuwaas oo ah tiirarka ugu muhiimsan ee  karaamada aadanaha.

### A) Caqabadaha iyo Fogeynta

- Fikradaha khaldan ee bulshada ay ka qabto dadka naafada ah ayaa sii xoojiyay takoorka, kuwaasoo sababay in marar badan aysan naafadu helin mudnaanta ay u qalmaan marka la dejinayo siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed ee Dalka. Sidoo kale qoysas badan oo ay u joogaan dad naafo ah ma laha wacyigii iyo dhaqaalihii ay u baahnaayeen si ay u siiyaan taageero ku filan, taasoo keentay sii-jiritaanka faqriga iyo fogeynta ama dhibaatada ay naafadu la daalaa dhacayso. Si gaar ah, dadka naafada ah ee ku nool deegaannada baadiyaha ah, halkaas oo ay weli ku xooggan yihiin dhaqammada iyo caadooyinka xun-xun ee lidka ku ah dadka naafada ah, ayaa wajahaya fogeyn joogto ah. Arrintani waxay sababtay in dadka naafada ahi aysan si muuqata uga qayb-gelin nolol maalmeedka bulshada.

- Caqabadaha ugu waaweyn ee dadka naafada ah la daalaa dhacaan waxaa kamid ah helitaan la'aanta waxbarasho; iyadoo iskuullada badankoodu aysan u diyaarsaneyn jawi ay carruurta naafada ahi ay wax ku baran karaan. Sidoo kale, helitaanka adeegyada caafimaadka iyo kuwa kale ee asaasiga ah ayaa ah kuwo xaddidan, sababo la xiriira in xarumahaasi aysan ahayn kuwo si siman loo heli karo.

### B) Saameynta Colaadaha iyo Musiibooyinka Rabbaaniga ah:

- Dagaalladii sokeeye iyo xasillooni darrada muddada dheer ka jiray Dalka ayaa si toos ah u saameeyay dadka naafada ah, iyadoo ay kordhay tirada dadka ku naafooba colaadaha. Isla markaana, burburka kaabayaasha adeegyada bulshada iyo baabi'itaanka hay'adihii bixin jiray daryeelka bulshada ayaa hoos u dhigay fursadaha lagu heli karo adeegyada soo kabashada iyo qalabka lagu taageero dadka naafada ah.
- Masiibooyinka dabiiciga ah sida abaaraha iyo fatahaadaha ayaa sidoo kale si xad dhaaf ah u saameeyay dadka naafada ah. Inta badan, qorsheyaasha gurmadka

deg-degga ah iyo daad-gureynta dadka ay dhibaatadu saameyso ma daboolaan baahiyaha gaarka ah ee dadka naafada ah, taasoo keentay in si aan sinnayn ay u saameeyso bulshada.

**C) Dal-daloollada Hay'adeed iyo kuwa Sharci**

- Inkastoo Dastuurka KMG ah ee Soomaaliya uu dammaanad qaaday sinnaanta iyo mamnuucista takoorka, waxaa muddo dheer muuqday baahi weyn oo loo qabo sharciyo gaar ah oo si cad u nidaamiya xuquuqda dadka naafada ah. Iyadoo taas la'aanteed aysan dadka naafada ahi helin hannaan rasmi ah oo ay ku raadsadaan caddaalad, ilaalin iyo taageero sharciyeed.

**D) Horumarka laga sameeyay Arrimaha Naafada**

- Iyadoo ay jiraan caqabadahan soo-jireenka ah, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay waayadan dambe ku tallaabsatay horumarro la taaban karo oo ku aaddan wax-ka-qabashada baahiyaha dadka naafada ah:
- **Dhisidda Hay'adda Naafada Qaranka:** Asaasidda Hay'addan waxay ahayd guul horumar leh. Hay'addani waxay u dooddaa xuquuqda dadka naafada ah, sidoo kale waxay ka shaqeysaa sidii loogu dari lahaa siyaasadaha iyo barnaamijyada Qaranka baahiyaha naafada, waxaa kale oo ay isku dubbariddaa dadaallada kor loogu qaadayo helitaanka adeegyada iyo agabka ku habboon baahiyahooda.

- **Horumar Sharci:** Dowladda Soomaaliya waxay soo saartay Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed taas oo ah guul weyn oo ku astaysan geeddi-socodka horumarinta xuquuqda dadka naafada. Sharcigan wuxuu dammaanad-qaad sharci siinayaa ilaalinta xuquuqda naafada, wuxuuna xaqiijinayaa ka-qeyb-galka naafada ee dhammaan qeybaha bulshada, sidoo kale wuxuu waajibinayaa in dhammaan xarumaha adeegga bixiya, kuwa Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahayba ay noqodaan xarumo ay naafadu geli karaan oo ay ka heli karaan adeegyada ay bixiyaan.

- **Dammaanado Dastuuuri ah:** Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya iyo Wax-ka-beddeladiisaba waxay xoojinayaan sinnaanta iyo ilaalinta dadka nugul. Qodobbadiisu waxay si cad u dammaanad-qaadayaan xuquuqda dadka nugul oo ay ka mid yihiin dadka naafada ah, si ay qeyb uga noqdaan nolosha dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed.

**E) Caqabadaha Jira:**

Waxaa jira caqabado badan iyadoo la sameeyay horumarradaas:

- **Adeegyada Kaabayaasha:** Dhismayaasha guud, nidaamyada gaadiidka iyo isgaarsiinta ayaa weli ah kuwo aysan naafadu adeegsan karin, taasoo caqabad

ku ah gudashada hawlmaal-meedkooda iyo helidda adeegyada asaasiga ah toona.

- **Ka-qeyb-gal Dhaqaale:** Fursadaha shaqaaleysiinta dadka naafadu ah waa kuwo aad u yar, sababo la xiriira tababar la'aan dhanka xirfadda ah iyo goobaha shaqada oo aan si siman loo helin. Kuwo badan oo iyaga ka mid ah waxay la noolyihiin faqri, waxayna noloshoodu ku tiirsantahay taageerada qoysaskooda iyo deeqda samafalayaasha.
- **Kor u qaadidda Wacyiga Bulshada:** dhaqamada qaar ee bulsho oo ku aaddan takooridda iyo faquuqa ayaa weli caqabad weyn ku ah is-dhex-galka dadka naafada ah iyo bulshada inteeda kale, gaar ahaan meelaha miyiga ah.
- **Waxbarashada iyo Hormarinta Xirfadaha:** Iskuullo badan ayaan haysan dhaqaalihii ay ku dabooli lahaayeen baahiyaha dadka naafada ah, taasoo keenta in carruur badan oo naafo ahi aysan iskuulladu diiwan-gelin sidaasna ay waxbarashada uga haraan.

Caqabadahan soo-jireenka ah ee weli taagan, waxay daaha ka rogayaan baahida deg-degga ah ee loo qabo Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed. Siyaasaddan waxaa lagu duldhisay guulihii hay'adeed iyo sharci ee la gaaray, si looga gudbo caqabadihii aan soo tilmaanay ee naafada ka hortaagnaa ka-qeyb-galka adeegyada bulshada. Siyaasaddani waxay ujeeddadeedu tahay in la abuuro bulsho si dhammeystiran oo siman uga wada qeyb-qaadanaysa horumarka dhaqaale iyo bulsho ee Soomaaliya, si kor loogu qaado xuquuqda iyo karaamada dadka naafada ah.

## 1.2 Hordhac

Soomaaliya waxey horumar la taaban karo ka samaysay dhinaca sharciyada iyo maamulka ee arrimaha la xiriira dadka naafada ah. Dadaalladaas waxay muujinayaan muhiimadda dhisidda bulsho ka turjumaysa sinnaanta, isla markaana dhammaan qeybaheeda kala gadisan ay si siman uga qayb-qaataan nolosha bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed. In kastoo horumarro laga sameeyay dhinacyada qaarkood, haddana dadka naafada ah ee ku nool Soomaaliya waxay weli la tacaalayaan caqabado isugu jira kuwo sharci, dhaqan-dhaqaale, adeeg la'aan iyo matalaad xumo.

Siyaasaddan Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waxay si cad u aqoonsan tahay caqabadahaasi, waxayna tilmaamaysaa jihada loo marayo xal u helkooda, iyadoo la adeegsanayo hannaan ku saleysan ka-qeybgelin dhab ah, sinnaanta fursadaha iyo xaqiijinta caddaaladda. Siyaasaddu waxay u taagan tahay ballanqaad Qaran oo dhisaya bulsho u taagan ixtiraamka, karaamada, iyo awoodsiinta dadka naafada ah.

**Aragti iyo Farriin:**

- **Aragti:** In la dhiso bulsho Soomaaliyeed oo si buuxda u aqbasha xuquuqda, karaamada, iyo kartida dadka naafada ah, una suurtagelisa inay si siman uga qeyb-qaataan dhammaan dhinacyada nolosha.
- **Farriin:** In dadka naafada ah loo suurta geliyo ka-qeybgal buuxa oo ku aaddan maamulka, dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada, iyadoo loo marayo siyaasad loo dhanyahay, adeegyo la wada heli karo iyo ololeyaal wacyigelineed si loo abuuro dhaqan is-ixtiraam iyo is-aqbal ku dhisan.

**A) Baaxadda Siyaasadda:**

- Siyaasaddu waxay daboolaysaa dhammaan dhinacyada horumarka ee saameeya dadka naafada ah, gaar ahaan kuwa la xiriira maamulka, bulshada, iyo dhaqaalaha. Waxay si gaar ah diiradda u saareysaa arrimaha waxbarashada, shaqada, caafimaadka, helitaanka adeegyada asaasiga ah, iyo ka-qeybgalka arrimaha go'aan qaadashada. Siyaasaddu waxay khuseysaa dhammaan hay'adaha Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay, iyadoo xoojinaysa iskaashiga u dhexeeya bulshada, hay'adaha Dowladda, bulshada rayidka ah, iyo saaxiibbada caalamiga ah.

**B) Ujeeddooyinka Siyaasadda:**

i. **Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda:** Xoojinta hannaanka sharci si loo ilaaliyo karaamada, loo ciribtiro takoorka, loona xaqiijiyo cadaaladda isla markaasna kor loogu qaado xuquuqda naafada.

ii. **Xoojinta Helidda Adeegyada iyo Ka-qeyb-galka:** Horumarinta helitaanka adeegyada aasaasiga ah sida waxbarashada, shaqada, caafimaadka, iyo tababarrada xirfadeed si kor loogu qaado ka-qeybgalka dadka naafada ah ee maamulka, hoggaanka, iyo go'aan-qaadashada.

iii. **Dhisidda Bulsho iyo Hannaan loo dhan yahay:** Kor-u-qaadidda iskaashiga u dhexeeya Dowladda, hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo bulshada rayidka ah si loo hirgeliyo halbeegyada caalamiga ah ee xuquuqda dadka naafada, lana abaabulo ololeyaal wacyigelineed oo wax ka beddela fikirka bulshada, una horseeda dhaqan is-afgarad iyo is-aqbal ku saleysan.

iv. **Xaqiijinta Hirgelinta Siyaasadda:** Diyaarinta habab lagu hirgelinayo, lagu kormeerayo, laguna qiimeynayo siyaasaddan, si loo joogteeyo isla-xisaabtan daahfuran, loona gaaro horumar joogto ah oo la taaban karo.

## 2. HABRAACA DIYAARINTA SIYAASADDA

Diyaarinta Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waxaa loo maray hannaan dhammaystiran oo laga wada qayb-qaatay, si loo xaqiijiyo in siyaasaddu si dhab ah u xalliso caqabadaha ay la kulmaan dadka naafada ahi, iyadoo la waafajinayo halbeegyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah iyo arrimaha hortabinta u leh Qaranka. Waxaa sidoo kale la adeegsaday cilmi-baaris, wadatashi lala yeeshay daneeyayaasha Siyaasadda iyo xog uruurin si loo diyaariyo siyaasad ku salaysan xaqiiqda kana tarjumaysa baahiyaha gaarka ah ee dadka naafada.

### 2.1 Cilmi-baaris

- Ujeeddada cilmi-baaristu waxay muhiiim u ahayd in la ogaado sharciyadda, dal-daloollada iyo fursadaha jira. Waxaa daraasad lagu sameeyay nidaamka sharci ee Soomaaliya sida Dastuurka, Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed ee Sharci Lr. 29 ee 02/12/2024 iyo Sharci Lr. 134 ee soo baxay 31/12/2018, kaasoo lagu dhisay Hay'adda Naafada Qaranka, waxaana lagu ogaaday ka-go'naanshaha xukuumadda ee horumarinta xuquuqda dadka naafada ah, sidoo kale, waxaa diiradda la saaray meelaha u baahan xoojin sharci. Sidoo kale waxay daraasaddu dul-istaagtay Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Naafada (CRPD) oo ay Soomaaliya qeyb ka tahay iyo Ujeeddooyinka Horumarka Waare ee Qaramada Midoobay (SDGs), si Siyaasaddu ula jaan-qaaddo heerarka caalamiga ah ee xuquuqda naafada. sidoo kale waxaa la darsay warbixinnada la xiriira dadka naafada ah taasoo keentay in la ogaado xaaladda dhaqan-dhaqaale ee naafada.

### 2.2 Wadatashiyada Daneeyayaasha Siyaasadda

- Waxaa wadatashiyo lala yeeshay daneeyayaasha sida dadka naafada ah si loo ogaado xaqiiqda dhabta ah ee ay la noolyihiin, sidoo kale, waxaa wadatashiyada qeybta ka ahaa hay'adaha Dowladda ee ay khuseyso gaar ahaan Wasaaradaha Waxbarashada, Caafimaadka, Hawlaha Guud, Shaqada & arrimaha bulshada iyo Cadaaladda si loo xoojiyo iskaashiga la xiriira arrimaha ka wada dhexeeya ee naafada la xiriira. Waxaa sidoo kale la-tashiyo lala yeeshay bulshada qeybaheeda kala duwan iyo saaxiibbada caalamka, si loo helo khibrada shaqo oo ku aaddan xuquuqda naafada.

### 2.4 Falanqeyn iyo Is-barbardhig

- Waxaa si gaar ah odorosid loogu sameeyay siyaasado dhawr ah oo la xiriira xuquuqda dadka naafada ah si looga faa'iidaysto meelaha ay ku xooggan yihiin, iyadoo la ilaalinayo xaaladdaha dadka naafada ah iyo awoodda Dowladda, iyadoo la waafajiynayo Heshiiska Caalamiga ah ee Xuquuqda Naafada iyo Ujeeddooyinka Horumarka Waara ee Qaramada Midoobay.

- Habraacyadani waxay qeyb ka qaateen in siyaasaddu noqoto mid si sax ah uga tarjumaysa baahiyaha gaarka ah ee dadka Naafada Soomaaliyeed isla markaasna abuuraysa hindiseyaal lagu xalliyo dhibaatooyinka jira ee ragaadiyay dadka naafada ah Soomaaliyeed. Iyadoo laga faa'iidaysanayo natiijooyinkii wadatashiyada, cilmi-baarista iyo is-barbardhigyada, Siyaasaddu waxay abuuraysaa geeddi-socod lagu horumarinayo nolasha dadka naafada ah taasoo keenaysa lahaanshiiyo, isla-xisaabtan iyo saameyn muddo dheer ah isla markaasna ka dhigaysa siyaasaddu mid la dhaqan-gelin karo isbeddelna horseedda.

## 3. QEYBAHA SIYAASADDA

### 3.1. Qaab-dhismeedka Sharci iyo Dhaqan-gelinta Siyaasadda

Siyaasadda Qaran ee Naafada waxaa lagu duldhisay qaab-dhismeed sharci iyo mid maamul oo xooggan, Hay'adda Naafada Qaranka ayaa udub dhexaad u ah isla markaasna mas'uul ka ah dhaqan-gelinta Siyaasaddan. Waxayna warbixin joogto ah ka siinaysaa Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Qaab-dhismeedkani wuxuu dammaanad-qaadayaa istiraatiijiyad hoggaamineed oo isku-dubbarida hay'adaha iyo u hoggaansamidda sharciyada Qaran iyo kuwa caalamiga ah, si loo horumariyo is-dhex-galka naafada ee bulshada iyo kor u qaadidda xuquuqdooda.

#### A) Hannaanka  Sharci

I. Dastuurka Ku-meel-gaarka ah ee Soomaaliya ayaa asaas u ah Siyaasaddan Qaran ee dadka Naafada Soomaaliyeed:

  - Qodobka 27aad ee Wax-ka-beddelka Datuurka ee 2024, wuxuu Dowladda ku waajibinayaa inay ilaaliso kooxaha nugul sida dadka naafada ah isla markaana ay dammaanad-qaaddo in fursadaha bulshada dhexdeeda ah ay dadka naafada ahi u helaan si la mid ah bulshada inteeda kale.
  - Qodobka 28aad wuxuu xoojinayaa xaqa waxbarashada, wuxuuna tilmaamayaa in loo sinnaado xaq waxbrashada, goobaha wax lagu bartana laga dhigo kuwo dadka naafada ah u suurta-gelinaya inay wax ku bartaan.
  - Qodobka 43aad wuxuu si gaar ah uga hedlayaa helitaanka adeegyada, kaasoo ku waajibinaya xukuumaddu inay xarumaha Dowladda iyo adeegyada ay bixiyaanba ay ahaadaan kuwo ay naafadu adeegsan karaan, kana heli karaan baahiyahooda.
  - Qodobbadan Dastuuriga ah waxay Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka awood u siinayaan inay ku garab istaagto Hay'adda Naafada kor u qaadidda is-dhexgalka dadka naafada ah iyo bulshada inteeda kale, isla markaasna loo suurageliyo inay ka faa'iidaystaan adeegyada ay bulshadu hesho.

II. Sharci Lr. 134 ee 31/12/2018, wuxuu dhisay Hay'adda Naafada Qaranka, wuxuuna awood u siiyay Sharcigu matalaadda naafada iyo isku-duwidda hawlaha iyo hindisayaashooda, halka Wasaaradda Qosyku ay tahay hay'adda u xilsaaran diyaarinta xeerarka, xeer-nidaamiyeyaasha iyo siyaasadaha la xiriira Naafada Soomaaliyeed. Sidoo kale, Hay'adda Naafada Qaranka, waxay isku-dubbariddaa arrimaha naafada, kala duwan ee labada heer iyo Hay'adaha kale ee Dowladda ee la xiriira arrimaha naafada.

III. Wasaaraddu waxay diyaarisay Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaliyeed- Sharci Lr. 29 ee 02/12/2024 iyo Sharci Lr. 134 ee 31/12/2018, oo ilaalin buuxda iyo dammaanad-qaad siinaya dadka naafada ah. si ay u helaan xuquuqdooda la xiriirta helidda adeegyada caafimaadka, waxbarashada iyo fursadaha shaqaalaysiinta 5% shaqaalaha dowlada iyo shaqaalaha shirkadaha rayidka iyo matalaad siyaasadeed 5% dhamaan golayaasha dowlada heerarkooda kala duwan sida ku cad Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed. Sidoo kale sharcigani wuxuu xoojinayaa in la meel-mariyo tallaabooyin looga hortagayo takoorka lagula kaca dadka naafada ah, isla markaasna farayaa in xarumaha bixiya adeegyada bulshada kuwa guud iyo kuwa gaarka ahba ay ahaadaan kuwo naafado ka faa'iidaysan karaan isla markaasna la adeegsan karo si siman.

IV. Soomaaliya waxay ku biirtay Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah (UN-CRPD), sida ku cad Sharci Lr. 11 ee soo baxay 20/06/2019, tallaabadaas oo Qaranka ku waajibinaysa in sharciyadeennu la jaan-qaadaan xeerarka caalamiga ah, kana hortagaan takoorka, una fududeeyaan helitaanka adeegyada si siman iyo in dadka naafada ahi ay qeyb ka noqdaan hawlaha bulshada looqabanayo. Sidoo kale, Siyaasaddu waxay la jaanqaadaysaa Ujeeddooyinka Horumarka Waara (SDGs), gaar ahaan kuwa diiradda saaraya dhimidda sinaan la'aanta iyo horumarinta ka wada qeybgalka horumarka.

**B) Dhaqan-Galinta Siyaasadda**

I. Hay'adda Naafada Qaranka ayaa mas'uulka ka ah fulinta Siyaasaddan, waxa ayna warbixin joogta ah ka siineysaa Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Hormarinta Xuquuqul Insaanka, Hay'addu waxay dejinaysaa Istiraatiijiyadaha iyo hawlaha hortabinta u-leh dadka naafada ah, waxayna hubinaysaa in dhammaan hawlaha xukuumaddu ay ahaadaan kuwo la jaanqaadaya ujeeddooyinka Siyasaaddan. Wasaaraddu waxay diyaarinaysaa oo ay dib-u-eegis ku samaynaysaa dhammaan siyaasadaha

la xiriira dadka naafada ah, waxayna hoggaaminaysaa iskaashiga iyo isku-duwidda arrimaha u dhaxeeya wasaaradaha ee labada heerba, sidoo kale waxay warbixin ka waydiinaysaa Hay'adda Naafada Qaranka hawlaha la xiriira arrimaha dadka naafada ah kuwaas oo fulintooda ay u xilsaarantahay Hay'ada Naafadu si loo helo isla xisaabtan daah-furan.

II. Hay'adda Naafada Qaranku, waxay si gaar ah u dhaqan-gelinaysaa hindisayaasha la xiriira dadka naafada ah, iyadoo ku shaqeynaysa korjoogtaynta Wasiirka Wasaaradda Qoyska. Waxay u qareemaysaa xuquuqda dadka naafada ah, waxay qaban-qaabinaysaa ololeyaasha wacyigelineed ee looga hortagayo faquuqa dadka naafada ah ee kajira bulshada dhexdeeda, waxayna iskaashi la sameynaysaa dhammaan daneeyaasha arrimaha dadka naafada ah sida saaxiibbada caalamka si ay u helaan dadka naafada ahi taageero farsamo.

III. Ururrada u dhaq-dhaqaaqa arrimaha naafada iyo kuwa ay Madaxda ka yihiin Dadka Naafada ahi waxay qeyb ka yihiin dadaallada xukuumaddu kor ugu qaadayso in si gooni ah loo taageero, si loo xaqiijiyo helidda xuquuqddooda aasaasiga ah ee dadka naafada ah. Hay'adda Naafada Qaranka waxay ka shaqeynaysaa sidii ururradaasi loola shaqeyn lahaa si loo ogaado caqabadaha ay sida gaarka ah ula kulmaan si looga hawlgalo hannaankii lagu yareyn lahaa dhibaatooyinka goonida u ah bulshada inteeda nugul.

IV. Wasaaraddu waxay sidoo kale wadashaqeyn xooggan kala yeelanaysaa hirgelinta Siyaasaddan Hay'adaha Qaramda Midoobay, Ururrada Caalamiga ah ee aan Dowliga ahayn, si loo helo waaya-aragnimo farsamo iyo hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee la xiriira xaqiijinta xuquuqda dadka naafada ah.

V. Hay'addu waxay ka shaqeynaysaa sidii dhammaan sharciyada Dalku ula jaanqaadi lahaayeen Heshiiska Qaramada Midoobay ee Xuquuqda Dadka Naafada ah, iyadoo la kaashanaysa Hay'adaha kale ee Dowlada ee ku shaqada leh arrimahan si loo xaqiijiyo ka qeyb-galka dadka naafada ah ee arrimaha bulshada iyo in la helo adeegyada ay Dowladu bixiso. Sidoo kale wasaaraddu waxay soo saaraysaa hagayaal la xiriira horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha iyo xarumaha adeegga guud iyo kuwa gaarka ah bixiya si'ay u noqdaan kuwo ay dadka naafad ah adeegsan karaan, si ciddii u hogaansami weyda tilmaamahaas ay umutaysato anshaxmarin iyo

in ay hesho hannaan caddaaladeed oo sharci ah cidii la kulanta tacaddi ku aaddan takoor lagula kacay qof naafa ah.

Xoojinta hannaanka sharci iyo midka maamul oo ay udub-dhexaad u yihiin Wasaaradda Qoyska iyo Hay'adda Naafada Qaranka waxay xaqiijinaysaa in Siyaasaddan loo hirgeliyo si wax-ku-ool ah.

**3.2 Xaqiijinta Ka qeybgal dhammeystiran**

- Helidda u-dhammaansho iyo ka qeyb-gal buuxa waa labo mabda' oo asaas u ah in la helo fursado isku dheelli tiran iyo ka-qeybgal bulsho dhammeystiran. Iyadoo laga duulayo caqabadaha ku hor gudban helidda adeegyadan sida kuwa kaabayaasha dhaqaalaha iyo marin u helidda dhismayaasha oo aan ahayn kuwo ay adeegsan karaan naafada iyo adeegyada kale ee bulshada sida waxbarashada, shaqada, helidda xogta iyo daryeelka caafimaadka oo ah kuwo aysan naafadu si sahlan uga faa'iidaysan karin, ayaa siyaasaddani si gaar ah diiradda u saareysaa awoodsiinta dadka naafada ah si ay si buuxda ugaga qeyb-qaataan ugana faa'iidaystaan dhammaan adeegyada kala duwan ee bulshada si la mid ah dadka kale.

**A) Kaabayaal Dhismo oo la Adeegsan Karo**

- Kaabayaasha dhisme ee la adeegsan karo waa tiir asaas u ah siyaasaddan, wuxuuna awood u siinaya dadka naafada ah inay si buuxda uga qeyb-qaataan arrimaha dhaqaale, horumarka bulshada iyo midka siyaasadeed. Siyaasaddu waxay mudnaanta siinaysaa kaabayaasha dhismo inay noqdaan kuwo ay dadka naafada ahi adeegsan karaan, iyadoo la raacayo tallaabooyinka soo socda:

**I. Halbeegyo iyo Xeerar Maamul**

- Wasaaradda Hawlaha Guud waa inay soo saartaa halbeegyo iyo xeerar maamul oo hagaya dhismayaasha cusub ee Danta-guud iyo kaabayaasha adeegyada bulshada bixiya, sida albaabbada, jaranjarooyinka, wiishashka meelaha looga baahan yahay, marinnada naafadu adeegsato, boorar ay ku qorantahay farta indhoolayaasha Baraylka dhismayaasha gudahooda, musqulo ay adeegsan karaan, iyadoo lala kaashanayo Hay'adda Naafada Qaranka iyo Wasaaradda Qoyska.

**II. Dib-u-habeynta Kaabayaasha Dhisme ee Jira**

- Waxaa mudnaanta iyo hortabinta la siinayaa dib-u-qaabeynta xarumaha waxbarashada, caafimaadka iyo dhismayaasha Dawladda, si loo xalliyo caqabadaha naafadu ku qabaan kaabayaashaas, loogana dhigo goobo ay adeegsan karaan.

## III. Gaadiidka iyo Socodka

Siyaasaddani waxay hiigsanaysaa mustaqbalka in adeegyada gaadiidka dadweynaha ay yeeshaan astaamo taageeraya dadka naafada ah sida in gaadiidka loo sameeyo qaab ay ku kori karaan naafadu, kuraas gaar ah oo ay fariistaan, qalab cod iyo muuqaalba bixinaya oo dadka naafada ahi adeegsan karaan. Sidoo kale in waddooyinka dadku ku lugeeyaan loo qaabeeyo hab u sahlaya iney dadka naafada ahi adeegsadaan.

## IV. Ka-qebgalka iyo iskaashiga bulshada

Hay'adaha iyo shaqsiyaadka sameeya arrimaha Naqshadeeynta, injineerrada dhismaha iyo shirkadaha wax dhisa waa inay qeyb ka noqdaan fulinta Hagayaasha Kaabayaasha Dhismaha ee lawada adeegsan karo, iyadoo lagala tashanayo Wasaaradda Qoyska iyo Xuquul Insaanka iyo Hay'adda Naafada Qaranka ee u idman arrimaha dadka naafada ah.

### B) Isgaarsiin lawada Adeegsan karo

Hirgalinta isgaarsiin lawada adeegsan karo waxay dadka naafada ah u suurta-galinaysaa in si siman ay uwada helaan xogaha iyo macluumaadka ay u wada baahanyihiin, taasoo xaqiijinaysa in dadka naafada ahi ay si dhammeystiran qeyb uga ahaadaan nolosha bulshada.

Siyaasaddani waxay xoojinaysaa ballaarinta helidda qalab teknooloji oo caawinaya naafada sida qalabka wax akhriya, qalabka farta (Braille), sameecadaha maqalka, nidaamyada codka qoraalka u roga. Waa in Website-yada xukuumadda iyo xiriirka guud ay ahaadaan kuwo laga wada faa'iidaysan karo. Hay'adaha isgaarsiinta bixiyo iyo bulshadaba waa in karaankooda kor loo qaadaa si ay qeyb uga noqdaan helidda adeeg isgaarsiineed oo la wada adeegsan karo lagana faa'iidaysan karo. Teknoolojiyada waa in laga faa'iidaystaa sida barnaamijyada moobilka iyo xalalka ku shaqeeya AI-da waxay xoojinayaa helitaanka isgaarsiin loo dhan yahay.

### C) Istiraatiijiyadaha Dijitaalka ah ee loo dhanyahay

- Hirgelinta dijitaal loo dhan yahay oo la wada adeegsan karo, waxay ka saacidaysaa naafada inay helaan waxbarasho, shaqo iyo adeegyada guud. Qalab teknoolojiyadeed oo la heli karo iyo adeeg internet ah oo ay naafadu isticmaali karto ayaa ah kuwo mudnaanta kowaad leh.

- Waa in la sameeyo barnaamijyo tababar si kor loogu qaado aqoonta naafada ee la xiriirta dijitaalka. Qalabka teknoolojiyadeed ee wax caawiya sida qalabka tooska wax u tarjuma, kuwa wax haga ayaa si weyn uga qeyb noqonaya helitaanka dijitaal loo dhan yahay.

- Siyaasadda Naafada Qaranku waxay abuuraysaa jawi ay dadka naafada ahi ugu dhex maraan bulshooyinkooda si badbaado iyo madaxbannaani leh, waxayna xoojinaysaa helidda cadaalad iyo wada noolaansho bulsho, iyo hubinta in dadka naafada ahi ay awood u yeeshaan in ay ku noolaadaan nolol buuxda oo ay qayb ka noqdaan horumarinta Qaranka.

**3.3 Awoodsiin Dhaqaale**

- Awoodsiinta dhaqaale waa in loo qaabeeyaa hab yaraynaya ku tiirsanaanta naafada ay ku tiirsantahay dadka kale, isla markaasna xoojinaya madax-bannaanidooda iyo inay noqdaan kuwo ku filan nolashooda caadiga ah, kana qeby-qaata horumarka Dalka. Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa abuurista fursado shaqaaleysiin, horumarin xirfadeed iyo fursado ganacsi, iyadoo abbaaraysa yareynta caqabadaha joogtada ah ee naafada ka xaddidaya inay qeyb ka ahaadaan dhaqaalaha Dalka.

**A) Horumarin Xirfadeed**

- Xarumaha takhasusiga ah ee tababarka xirfadeed ee naafada waa in lagu diyaariyaa qalab iyo teknoolojiyada lagama maarmaanka u ah daboolidda baahiyaha kala duwan ee naafada, sida barnaamijyo saacidaya naafada aragga la', kuwa maqalka la' ama qalab aan u baahnayn in gacmaha lagu adeegsado oo loogu talagalay naafada dhaqdhaqaaqoodu xaddidan yahay. Xarumahan tababar waa inay bixiyaan tababarro kala duwan sida faryaamada, harqaanka, wax beerista, teknoolojiyada iyo isgaarsiinta taasoo u suura-gelinaysa naafada inay bartaan qeybo badan oo xirfado ah ayna ka heli karaan kuwo ku habboon awoodda iyo rabitaanka naafada.

- Barnaamijyada tababar waxay xoogga saarayaan kuwo baahida badan loo qabo sida tamarta, teknoolojiyada iyo hal-abuurrada farshaxanka kuwaasoo abuuraya fursado shaqo oo dabacsan guryahana looga soo shaqeyn karo oo aan u baahnayn in goobta shaqada la xaadiro. Iskaashiga lala yeelanayo shirkadaha gaarka loo leeyahay in ururrada aan Dowliga ahayn waxay dammaanad-qaadayaan in barnaamijyadan ay xiriir la leeyihiin suuqyada shaqada. Sidoo kale tababarradan waxaa la soconaya tababarrada la xiriira xirfadaha noloshada sida xirfadda xiriirka, maareynta waqtiga, wada-shaqeynta kooxaha iyo ciribtirka

akhris-qoraal la'aanta, waana in macallimiinta bixinaysa ay u diyaarsanyihiin waxbaridda dadka naafada ah.

**B) Hababka Shaqo ee loo Dhanyahay**

- Siyaasaddu waxay soo jeedinaysaa hirgelinta hababka shaqo ee loo dhanyahay sida inay waajib tahay in la ilaaliyo qoondada naafada ee shaqo kasta oo Dowladeed ama gaar loo leeyahay si loo xaqiijiyo in dadka naafada ah ay matalaad ku yeeshaan dadaallada shaqo-bixinta. Waxay Wasaaradda iyo Hay’adda Naafadaba sameynayaan kormeerro joogta ah si loo hubiyo in qoondada naafada la ilaaliyay, shirkadaha ama hay’adaha ilaaliyana waxay heli doonaan dhiirrigelin iyo in loo qiro garab istaaggooda naafada.

- Loo-shaqeeyayaasha waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay hirgeliyaan hababka shaqaaleysiinta loo dhanyahay, iyagoo helaya haddii ay hirgeliyaan tixgalin gaar ah sida abaalmarinno maaddi ah iyo macnawi ah. Waxay Hay'adda Naafada qabaneysaa ololayaal Qaran oo kor loogu qaadayo khibradaha loo-shaqeeyayaasha ee la xiriira faa'iidooyinka ay leeyihiin shaqaaleysiinta dadka naafada ah sida hal-abuurka loo-shaqeeyaha oo kobca iyo goobta shaqada oo kala duwanaan waxtar leh yeelata.

**C) Deegaan Shaqo oo ku habboon Naafada**

- Waxaa la dhaqan-gelinayaa heerarka deegaanka shaqo ee naafada ku habboon, taasoo waajibinaysa in la helo waddooyinka naafada, wiishash marka ay lagama-maarmaan tahay iyo musqulo ay adeegsan karaan naafado. Sidoo kala shuruudo shaqo oo dabacsan ayaa loo diyaarinayaa naafada sida inay guryahooda kasoo shaqeyn karaan, iyo in loo oggolaado inay waqti kooban shaqeeyaan si loo ilaaliyo baahiyaha kala duwan ee naafada. Deeqaha loogu talagalay naafada waxay kaalmaynayaan shaqo-bixiyayaasha si ay u daboolaan kharashaadka hagaajinta goobta shaqada sida rakibidda ama sameynta qalabka naafada iyo qaabeynta xafiisyada si ay u noqodaan kuwo ay ku shaqeyn karaan.

**D) Ganacsiga iyo Ururrada Bulshada**

- Waa in la siiyo naafada taageero dhaqaale iyadoo loo marayo barnaamijyada deeqaha iyo maalgelinta yaryar ee loogu talagalay naafada iyo in la siiyo deymo (qardul-xasan). Iskaashiga lala yeelanayo bankiyada shirkadaha lacagta waxay dammaanad-qaadaysaa deyn-bixin dhammeystiran iyo inaan caqabadaha naafada ka haysta helidda raasamaal la yareeyo. Barnaamijyada dhisidda karaanka waxaa ka mid noqonaya kulamo-shaqo oo lagu baranayo ganacsiga

sida qorsheynta, suuq-geynta, maareynta maaliyadda iyo ballaarinta hawlaha ganacsiga. Waa in la hirgeliyo barnaamijiyo hagid ah oo kulminaya ganacsatada naafada ah iyo kuwa kale ee leh khibrad ganacsi oo dheeraad ah, si ay tilmaamo iyo hagitaanno u siiyaan uguna tilmaaman meelaha fursada badani ay ka jiraan.

- Xukuumaddu waxay dhiirrigelinaysaa hay'adaha bulshada ee shaqaaleysiiya dadka naafada ah ama bixiya adeegga naafada, iyadoo dhiirrigelinta ay heli doonaan kuwa mudnaanta siiya adeegyada saameynta togan ku leh bulshada. Dadaallada lagu abuurayo suuq loo dhanyahay waxaa ka mid ah, qabanqaabinta bandhigyada ganacsi, kulammada xiriirka ganacsatada, fagaarayaasha ganacsiga danabaysan, iyadoo si gaar ah fursadaha loo siinayo shirkadaha adeegyada naafada bixiyo iyo kuwa shaqaaleysiiya, waxaana arrintaas lagala kaashanayaa rugta ganacsiga.

**E) Tallaabooyinka Dheeraadka ah ee Awoodsiinta Dhaqaale**

- Ka-qaybgalka dadka naafada ah ee dhaqaalaha aan rasmiga ahayn waa arrin muhiim ah oo u baahan in la aqoonsado lagana dhigo mid rasmi ah. Si loo xoojiyo awooddooda dhaqaale, waxaa muhiim ah in la siiyo tababarro gaar ah iyo agab taageera oo u fududeynaya inay ku horumariyaan xirfadohooda, sida farsamada gacanta, beeraha, iyo ganacsiyada yaryar. Intaa waxaa dheer, barnaamijyo gaar ah oo lagu taageerayo shaqaaleysiinta ayaa lagu xiri doonaa dadka naafada ah shaqo-bixiyeyaasha, si loo hubiyo inay helaan shaqooyin ku habboon awoodahooda iyo baahidooda.

- Hay'addu waxay hirgelinaysaa shabakado ay ku mideysan yihiin dadka naafada ah ee shaqeeya, si ay ugu wadaagaan waayo-aragnimo iyo talooyin ku saabsan shaqada. Sidoo kale, waxay sameynaysaa nidaamyo kormeer oo loo adeegsanayo dabagalka xaaladda shaqaaleysiinta iyo qiimeynta waxtarka barnaamijyada awoodsiinta dhaqaale. Wada-tashiyo joogto ah oo lagu ogaanayo caqabadaha cusub ee soo baxa ayay qabanaysaa si loo xalliyo loona horumariyo ka-qaybgalka dadka naafada ah ee goobaha shaqada.

- Tallaabooyinkan aan soo xusnay waxay ujeedadoodu tahay in la abuuro bulsho ay dadka naafada ah ku gaaraan madaxbannaani dhaqaale, kagana qayb-qaataan kobaca dhaqaalaha ee Dalka, isla markaana helaan fursado siman oo shaqo iyo ganacsi. Markii caqabadaha laga gudbo lana xoojiyo ka-qeybgalka naafada ee arrimaha bulshada, Soomaaliya waxay fursad u heli kartaa inay kobciso awoodda dadkeeda oo dhan, taasoo horseedi karta horumar waara iyo midnimo bulsho oo xoog badan.

**3.4 Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada**

- Caafimaadka iyo taageerada bulshada waa muhiimadda koowaad ee nolosha dadka naafada ah. Siyaasadda Qaran ee Naafada Soomaaliyeed waxay xoogga saartaa in dadka naafada ah ay helaan daryeel caafimaad, qalab ka kaalmeynaya maareynta nolol maalmeedkooda iyo taageero bulsho oo adag, si loo daboolo baahiyahooda gaarka ah, iyadoo la tix-gelinayo duruufaha dalkeenna oo ka soo kabanaya colaado muddo dheer soo ragaadiyay.

**A) Adeegyo Daryeel Caafimaad oo loo Dhanyahay**

- Tababar gaar ah ayay Hay'addu bixineysaa iyadoo la kaashanaysa Wasaaradda Caafimaadka u diyaarinaysaa bixiyeyaasha adeegga caafimaadka si ay u fahmaan una daboolaan baahiyaha dadka naafada ah. Barnaamijyadan heerka Qaran ah ayaa diiradda saaraya sidii shaqaalaha caafimaadka loogu tababari lahaa wada-xiriirka ixtiraamka ku dhisan, bixinta adeegyo caafimaad oo loo dhan yahay, iyo fahamka baahiyaha gaarka ah ee dadka qaba naafo jireed, dareen, ama mid maskaxeed. Sidoo kale, tababarradan waxaa ku jiraya mowduucyo ka hadlaya dhaqanka, si loo yareeyo cunsuriyadda iyo qalad-fahamka ku saabsan dadka naafada ah ee bulshada Soomaaliyeed.

- Waxaa la xoojin doonaa adeegyada takhasusiga ah iyadoo laga abuuraya xarumaha caafimaadka Dowladda ee hadda jira qeybo gaar ah oo naafada loogu talagalay. qeybahani waxay bixinayaan daaweynta caadiga iyo midda maskaxeed ee naafada, waxaa sidoo kale la abuurayaa barnaamijyo lagu taageerayo naafada.

- Siyaasaddu waxay mudnaanta siinaysaa in xarumaha caafimaad ay noqdaan kuwo ay naafadu heli karto si fududna uga faa'iidaysan karto, iyadoo loo sameynayo waddooyin naafadu adeegsan karto, wiishash markii ay lagama-maarmaan noqoto, iyo musqulo ay isticmaali karaan naafada qeybaheeda kala duwan, kuwa indhaha, gacmaha ama lugaha naafada ka ah. Sidoo kale waa in xarumahaas laga helaa turjumaannada naafada, sida luqadda suul-dhabaaleynta iyo Baraaylka si naafadu uga faa'iidaysato adeegga daryeelka caafimaad.

**B) Agabyada Caafimaadka iyo Qalabka wax Caawiya**

- Si loo dammaanad-qaado helidda kharashka qalabka naafada kaalmeeya, xukuumaddu waxay taageero dhaqaale ku bixinaysaa helidda qalabka asaasiga ah sida kuraasta naafada lagu riixo, samaacadaha dadka maqalka la', xubnaha sanaaciga ah, ulaha dadka araga la' iyo qalabka  taageera ama toosiya xubnaha

jirka si gaar ah lafaha, kala-goysyada iyo muruqaha jirka loona yaqaanno (Orthotic braces). Waxayna Hay'adda Naafada sameyn doontaa xarumaha laga helo qalabkaas iyadoo kaashaneysa Wasaaradda Qoyska, si loo xaqiijiyo inay si siman dadka naafada ah u gaartay.

- Dawladdu waxay dhiirrigelinaysaa wax-soosaarka gudaha ee qalabkan si qiima macquul ah loogu helo iyadoo waliba laga sameynayo qalab tayo leh. Iskaashi lala sameeyo Jaamacadaha iyo Xarumaha Cilmi-baarista ayaa qeyb ka noqon doona hal-abuurro lagu xallinayo caqabada naafada ka haysta isku-socodka iyo wada xiriirka. Hay’addu waxay sameynaysaa ololayaal wacygi-gelineed oo ay ka faa'iidaysanayaan naafada iyo qoysaskooda si loo baro adeegsiga qalabka kaalmeeya naafada, sidoo kale waxaa adeeg-bixiyayaasha caafimaadka lagu tababarayaa qiimaynta baahiyaha naafada iyo inay kula taliyaan hadba qalabka ku habboon.

**C) Barnaamijyada Gargaarka Bulshada (Social Safety Nets)**

- Barnaamijyada hawlgabka iyo kaalmada dhaqaale ee loogu talagalay dadka naafada ah ayaa la ballaarinayaa si ay u gaaraan dad badan, iyadoo la tix-gelinayo kharashaadka nolosha. Kaalmada dhaqaale ee ku saleysan baahiyaha waxay daboolaysaa kharashaadka adeegyada muhiimka u ah naafada sida hoyga, gaadi-idka iyo waxbarashada. Sidoo kale, daryeel-bixiyeyaasha taageera dadka naafada ah ayaa lagu caawin doonaa dhaqaale iyo tababarro gaar ah si loo fududeeyo hawlahooda.

- Tallaabooyinka taageero ee xaaladaha musiibooyinka rabbaaniga ah waa inay qeyb ka ahaadaan naafadu. Qorshayaasha xaaladaha degdegga ah waxay ka qeyb-qaadanayaan daadgureynta iyo adeegyada caafimaad ee xaaladaha degdegga ah, waxaana arrintan lala kaashanayaa ururrada bani'aadannimada ka shaqeeya si naafadu ay uga faa'iidaysato dadaallada gargaarka ee xaaladaha degdegga ah.

- Waxaa la dhiirrigelinayaa barnaamiyada gargaarka bulshada ee leh shaqaaleysiin loo dhan yahay oo ay naafadu qeyb ka yihiin, iyagoo si gaar ah uga faa’iidaysan doona barnaamijyada gargaarka lacageed ee ku shardiyaysan tababarrada xirfadeed ama ka qeybgalka adeegyada bushladeed. Barnaamijyadan waxay awoodsiinayaan dadka naafada ah iyagoo siinaya naafada amni dhaqaale, horumarin xirfadeed iyo ka qeybgal bulshadeed.

- Ballaarinta adeegyada daryeelkan caafimaad, horumarinta iyo fududeynta helitaanka qalabka naafada kaalmeeya, iyo xoojinta barnaamijyada gargaarka bulshada, waxay Soomaaliya u suuragelinayaan inay nidaam dhameystiran oo taageeraya caafimaadka iyo adkeysiga dhaqaale ee dadka naafada ah. Tallaabooyinkan waxay xoojinaysaa tayada nolasha naafada, hoosna u dhigaysaa nuglaantooda waxayna dammaanad-qaadayaan inuusan qofna ka harin geeddi-socodka horumarka Dalka.

**3.5 Wacyigelin iyo Waxbarid**

- Waxbarashada iyo wacyigelinta waa qeyb muhiim ah oo ka mid ah Siyaasaddan, waxayna lagama-maarmaan u yihiin ciribtirka cunsuriyadda, awoodsiinta dadka naafada ah, iyo dhisidda bulsho loo wada dhan yahay. Dadaalladan waxay diiradda saarayaan horumarinta fursadaha waxbarasho iyo kobcinta fahamka bulshada, si loo xaqiijiyo in xuquuqda iyo ka-qeybgalka dadka naafada ah la ixtiraamo.

**A) Qaab-dhismeed Waxbarasho oo loo Dhanyahay**

- Hababka waxbarashada ee loo dhan yahay ayaa mudnaan siinaya taageerada gaarka ah ee ardayda naafada ah. Qorsheyaal waxbarasho oo gaar ah ayay Wasaaradda Waxbarashadu sameynaysaa iyadoo la kaashanaysa Hay'addda Naafada Qaranka, si wax looga qabto baahiyaha gaarka ah ardayda naafada ah, iyadoo wax laga beddelayo hababka waxbaridda iyo xeeladaha qiimeynta. Waxaa la bixin doonaa qalabka kaalmeeya naafada, sida buugaagta Braille-ka, agabka maqalka, agabka taabashada ku shaqeeya, iyo agabka dijitaalka ah ee ku habboon tiknoolajiyada naafada. Tilmaamaha manhajka dabacsan ee loogu talagalay naafada ayaa hagaya dariiqooyin waxbarasho oo kala duwan, taasoo xaqiijinaysa guul waxbarasho oo loo dhanyahay.

- Tababarka macallimiinta iyo dhisidda karaankooda waa asaaska hirgelinta waxbarashada loo wada dhan yahay, sidaas darteed waxaa macallimiinta iyo maamulayaasha la siinayaa tababar diiradda saaraya kobcinta iyo kor u qaadidda wacyiga naafada, istaraatiijiyadaha waxbariddooda, iyo hab-raacyo loogu talagalay ardayda naafada ah. Barnaamijyo shahaadooyin takhasus ah bixiya ayay macallimiintu ka baranayaan xirfado kala duwan sida luqadda suul-dhabaaleynta (tilmaamaha), Braille-ka, iyo adeegsiga tiknoolojiyada naafada taageerta.

- Siyaasaddu waxay dhiirrigelintaysaa abuuridda deegaan waxbarasho oo loo dhan yahay sida in dugsiyada lagu qalabeeyo jaranjarooyin gaar ah, waddooyin

naafadu adeegsato, iyo musqulo ku habboon dadka naafada ah. Siyaasaddu Waxay higsanaysaa in fasallada lagu xoojiyo qalab naafada taageera sida nidaamyada maqalka, software-ka hadalka u beddela qoraal, iyo kuraasta loogu talagalay naafada. Fursadaha waxbarashada sare ayaa la ballaarin doonaa iyadoo la siinayo ardayda naafada ah deeqo waxbarasho iyo kaalmo dhaqaale.

**B) Ololayaal Wacyigelineed**

- Ololayaasha Qaran ayaa lagu wacyigelinayaa bulshada iyadoo ay hoggaamin doonta Hay'adda Naafada Qaranka si loola dagaallamo fikradaha khaldan ee ku saabsan naafada, iyadoo la muujinayo in naafo-nimadu aysan ceeb ahayn. Ololahani wuxuu isticmaalayaa ereyo aan xanaf lahayn si loo dhiirrigeliyo is-ixtiraamka iyo is-aqbalidda. Culimada iyo hoggaamiyeyaasha kale ee bulshada ayaa door muhiim ah ka qaadanaya, iyagoo farriimaha ka-mid-noqoshada bulshada ee naafada ku daraya khudbadaha ay jeedinayaan iyo munaasabadaha ay qabanayaan, si ay saameyn togan ugu yeeshaan aragtida bulshada ee ku aaddan naafada. Sidoo kale, odayaasha dhaqanka ayaa loo tababarayaa inay u doodaan xuquuqda dadka naafada ah oo ay qayb ka noqdaan go'aamada heer degaan.

- Warbaahinta ayaa la adeegsanayaa si loo muujiyo guulaha ay gaareen dadka naafada ah, iyadoo loo marayo filimaan dokumentari ah, warbixinno warbaahineed, iyo nuxur baraha bulshada lagu baahiyo. Ololayaasha wacyigelinta ayaa xoogga saaraya soo-bandhigidda tusaalooyin dad naafo ah oo guuleystay, si loo dhiirrigeliyo bulshada loona beddelo aragtida khaldan ee laga qabo naafada. Sidoo kale, madadaalada loo wada dhanyahay, sida filimmada iyo tiyaatarka, ayaa soo bandhigaya dadka naafada ah, iyagoo ku jira doorar wanaagsan. Dugsiyada ayaa qabanqaabinaya barnaamijyo wacyigelineed sida maalmo gaar ah oo lagu barayo ardayda muhiimadda naxariista iyo ka-qeyb-galka naafada ee arrimaha bulshada.

**C) Ka-qeyb-gelin Bulsho**

- Hal-abuurrada iyo hindisayaasha kor-u-qaadidda aqoonta waalidiinta waxay agaasimayaan kulan-hawleedyo iyo kooxo taageero si qoysaska looga kaalmeeyo fahmanka iyo garab istaagga carruurta naafada ah. Barnaamijyada noocan ah waxay daweynayaan afkaarta khaldan ee laga qabo naafada, waxayna kobcinayaan aragtiyada wanaagsan ee ku aaddan naafada. Taageerada shacabka waxay u suuragelinaysaa ururrada bulshada iyo ururrada dadka naafada ah inay hoggaamiyaan hawlaha wacyigelinta bulshada ee heer deegaan.

**D) Adeegsiga Teknoolojiyada ee Wacyigelinta iyo Waxbaridda**

- Tiknoolojiyada casriga ah ayaa ka caawinaysa ardayda naafada ah inay wax ku bartaan online-ka iyadoo la adeegsanayo barnaamijyo loo fududeeyay naafada. Barnaamiyada moobilka iyo qalabka dijitalka ah ayaa waxbarashada ka dhigaya mid xiiso leh oo firfircoon. Sidoo kale, baraha bulshada ayaa loo adeegsanayaa in lagu faafiyo wacyigelin, loogana sheekeysto guulaha naafada, laguna qabto aqoon-is-weydaarsiyo. Tiknoolojiyadu waxay waxbarashada iyo wacyigelinta gaarsiinaysaa meelo fog fog.

- Hirgelinta qaab-dhismeedka waxbarashada loo wada dhan yahay iyo ololayaasha wacyigelinta ayaa horseedaya bulsho fahamsan, naxariista, oo cid kasta ay ka qaybqaadato. Dugsiyada ayaa loo diyaarinayaa inay taageeraan ardayda naafada ah, halka warbaahinta iyo wada-shaqaynta bulshadu ay beddelayso aragtida bulshada ee ku aaddan naafada. Dadaalladan waxay xaqiijinayaan in qof walba, iyadoon loo eegin awoodda uu leeyahay, uu fursad u helo inuu wax barto, horumaro, oo uu ka qaybqaato horumarka Dalka.

**3.6 Matalaad iyo Ka-qeyb-gal Siyaasadeed**

Ka-qaybgalka siyaasadda iyo matalaadda ayaa lama huraan u ah xaqiijinta in dadka naafada ahi ay cod ku yeeshaan maamulka iyo siyaasad-dejinta. Siyaasadda Naafada Qaranku waxey qeexaysaa tillaabooyin dhammaystiran si kor loogu qaado ka mid ahaanshahooda hannaanka siyaasadda, go'aan-qaadashada, iyo doorarka hoggaamineed ee Dalka.

**A) Matalaad Siyaasadeed**

- Qoondooyinka loogu talo-galay dadka naafada ah waxaa lagu qeexay Qodobka 7aad faqraddiisa 3aad ee Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyed, Sharci Lr. 29 ee soo baxay 02/12/2024, kaasoo dadka naafada ah u oggolaanaya 5% (boqolkiiba shan) dhammaan goleyaasha Dawladda heer federaal iyo heer Dowlad goboleed, Gobolka Banaadir goleyaasha dawladaha hoose, Agaasimeyaasha Wasaaradaha iyo Guddiyada Madaxabannaan, Sidoo kale, qoondoyinkan ayaa lagu dabaqayaa xilalka fulinta iyo latalinta ee wasaaradaha iyo hay'adaha Dowladda, si ay uga qeyb-qaataan go'aan-qaadashada. Nidaamyada kormeerka iyo warbixinta ayaa loo adeegsanayaa hubinta in qoondoyinkan in si buuxda loo fuliyo.

- Barnaamijyada horumarinta hoggaaminta ayaa loo sameynayaa si dadka naafada ah loogu tababaro xirfadaha fagaare ka-hadalka, falanqaynta siyaasadda, wadaxaajoodka, iyo qorsheynta istiraatijiyadeed. Iskaashiyo lala yeelanayo

jaamacadaha, ururrada aan dowliga ahayn (NGOs), iyo hay'adaha caalamiga ah ayaa lagu siinayaa naafada deeqo waxbarasho iyo barnaamijyo latalin, si loo soo saaro jiil cusub oo hoggaamiyayaal ah oo ka tirsan dadka naafada ah. Soo-bandhigidda sheekooyinka guusha hoggaamiyeyaashan waxay burburinaysaa fikradaha khaldan isla markaana dhiirrigelinaysaa fikradaha togan.

- Xisbiyada siyaasadeed ayaa lagu dhiirrigelinayaa inay dadka naafada ah ku soo daraan liisaska musharrixiinta iyo jagooyinka hoggaanka. Abaalmarinno maaddi iyo macnawi ah ayaa la siinayaa xisbiyada si firfircoon u horumariya siyaasado iyo qorshayaal loo wada dhan yahay, si loo hubiyo in aragtida iyo baahiyaha dadka naafada ah lagu daro ajendayaasha siyaasadeed.

**B) Codbixin la Wada Heli Karo**

- Goobaha codbixinta waa in loo diyaariyaa si ay dadka naafada ah u codeyn karaan si madaxbannaan. Goobahaas waa in lagu rakibaa jaranjarooyin, waddooyinka naafada, iyo qalab codbixin oo ku habboon baahiyahooda. Sidoo kale, qalabka sida muraayadaha wax weyneeya iyo warqadaha Braille-ka waa in laga helaa intii suuragal ah, sidoo kale waa in shaqaalaha doorashada loo tababaraa inay si ixtiraam leh u caawiyaan dadka naafada ah inta ay codeynayaan.

- Habraacyada codbixinta waa inay ku jiraan habab kale sida in lagu soo codeeyo boosto, sanduuqyada wareega si dadka naafada ah ee aan tagi karin goobta codbixinta loogu suurageliyo inay codeeyaan. Sidoo kale waxay Siyaasaddu hiigsanaysaa in la adeegsado qalabka codeynta danabaysan ee la jaanqaadaya teknoolojiyada naafada kaalmeysa sida shaashadda aragga qoraalka weyneeysa iwm.

- Ololayaasha wacyigelinta codbixiyayaasha waxay xoogga saarayaan in naafada la baro xuquuqdooda doorashada iyo hannaanka codbixinta. Ololayaashan waxaa loo adeegsanayaa qalab u suuragelinaya naafada inay qeyb ka noqdaan codbixinta sida warqadaha farta waaweyn lagu qoray, qalabka codka bixiya iyo muuqaallo luqadda tilmaamanta ku baxaya, lagu fahmayo.

**C) Madallada U-qareemidda**

- Xoojinta Ururrada Dadka Naafada ah waa lama huraan si loo helo siyaasado wax-ku-ool ah. Taageerada dhaqaale iyo farsamo ee ay helayaan ururrada waxay awood u siinaysaa inay si wanaagsan u difaacaan xuquuqda dadka naafada ah oo ay saameyn ku yeeshaan go'aannada siyaasadeed. Sidoo kale, Hay'adda

Naafada Qaranka waxay hirgelinaysaa nidaamyo wadatashi oo rasmi ah si loo xaqiijiyo in ururradani ay qayb ka noqdaan diyaarinta iyo dib-u-eegista siyaasadaha la xiriira dadka naafada ah.

- Kor-u-qaadista ka-qaybgalka siyaasadeed iyo metelaadda dadka naafada ah waxay Soomaaliya u suurtagelinaysaa inay dadkaas ka dhigto kuwa door muuqda ku leh dejinta siyaasadaha saameeya noloshooda. Tallaabooyinkan waxay horseedayaan helitaanka bulsho loo wada dhan yahay oo dimoqraadi ah, halkaas oo maamulka uu ka tarjumayo codadka iyo baahiyaha kala duwan ee muwaadiniinta oo dhan. Dadaalladan, dadka naafada ah waxay awood u siinayaan inay si buuxda uga qeyb-qaataan horumarinta Dalka.

**3.7 Barnaamijyada Cadaaladda**

Barnaamijyada caddaaladda waa inay noqdaan kuwo dadka naafada ah u suuragelinaya inay helaan taageero sharci, ilaashadaan xuquuqdooda, oo si siman uga qaybqaataan nidaamka garsoorka. Siyaasadda Qaran ee Naafada waxay diiradda saaraysaa in la hirgeliyo tallaabooyin loo wada dhanyahay, si loo abuuro nidaam sharci oo cadaalad iyo sinnaansho ku dhisan, kaasoo u suurtagelinaya dadka naafada ah inay si madaxbannaan ula macaamilaan hay’adaha garsoorka oo ay xaqooda raadsadaan.

**A) Adeegyo Cadaaladeed oo la Wada Heli Karo**

- Hay’adda Naafada Qaranka waxay Wasaaradda Cadaaladda kala kaashanaysaa sidii loo hirgelin lahaa barnaamijyo kaalmo-sharciyeed ah si lacag la'aan ah ama la kafaalo qaaday u siiya dadka naafada ah, iyadoon loo eegeyn awooddooda dhaqaale. Waxaa la hirgelinayaa adeegyada gaarka ah ee la xiriira takoorka, xuquuqda shaqada iyo khilaafaadka hantida. Si kor loogu qaado wacyiga xirfadleyda sharci iyo saraakiisha sharciga fuliya waa in la siiyaa tababar la xiriira baahiyaha dadka naafada ah. Sidoo kale Xarumaha Sharci ee Jaamacadaha iyo kuwa hay'adaha aan dawliga ahayn waxay bixinayaan adeegyada talabixinta iyo matalaadda naafada ee maxkamadaha hortooda.

**B) Wacyigelinta Xuquuqda Sharci**

- Hay’addu waxay qabanqaabinaysaa aqoon-is-weydaarsiyo iyo ololayaal wacyigelineed si dadka naafada ah iyo qoysaskoodu u bartaan xuquuqdooda sharci, oo ay ku jiraan helitaanka adeegyada bulshada, iyo xuquuqda dhaxalka iyo hantida. Dadaalladan ayaa si gaar ah diiradda u saaraya bulshada miyiga iyo kuwa aan xogta wanaagsan helin. Sidoo kale, agab wacyigelin oo ku habboon dadka naafada ah, sida farta braille-ka, qoraallada waaweyn, iyo kuwa maqalka ah, waa in si ballaaran loo baahiyaa. Barnaamijyada dijitaalka ah ayaa sidoo kale

loo adeegsanayaa sidii macluumaadka loo gaarsiin lahaa dhammaan bulshooyinka, halka dugsiyadu manhajkooda lagu darayo waxbarashada xuquuqda sharci ee naafada si loo dhiso bulsho ku taagan is-ixtiraamta loo wada dhanyahay.

**C) Hannaan Garsoor oo la Heli Karo**

- Xarumaha sharciga sida maxkamadaha, saldhigyada booliska iyo xafiisyada qareennada iyo nootaayooyinka waa in loo diyaariyaa qaab u suuraglinaya naafada inay ka faa'iidaystan, waana inay yeeshaan marinnada naafada iyo musqulo ku habboon. Maxkamadaha iyo goobaha nasashada waa in la dhigaa kuraas munaasab ku ah naafada, sidoo kale waa inay maxkamadaha ku diyaarsan yihiin turjumaan luqadda tilmaanta iyo qalabka teknoolojiyada naafada saacida si ay uga qeyb-qaataan habraacyada sharci ee maxkamadaha.

- Baahinta barnaamijyada cadaaladda waxay xaqiijinaysaa in dadka naafada ahi ay si siman u helaan adeegyada sharci, taasoo u suuragelinaysa inay si buuxda u helaan xuquuqdooda. Xallinta caqabadaha ku jira nidaamka garsoorka, iyo kor-u-qaadista wacyiga xuquuqda sharciga ah, waxay Siyaasaddan ka dhigaysaa mid dhiirrigelisa helitaanka bulsho loo wada dhan yahay oo caddaalad ah. Tallaabooyinkan waxay sare u qaadayaan kalsoonida shacabka ee hay'adaha sharciga Soomaaliya, iyo hubinta in dhammaan muwaadiniinta loola dhaqmo si sharaf leh, cadaalad ah, oo ixtiraam uu ku jiro.

## 4. Istiraatiijiyadaha Hirgelinta Siyaasadda iyo Ka-qeyb-galka Daneeyeyaasha

Hirgelinta Siyaasadda waxay ku xiran tahay in si wadajir ah, xilliyaysan oo loo dhanyahay looga wada shaqeeyo. Istaraatiijiyadani waxay hubinaysaa in siyaasaddu ay si wax-ku-ool ah u wajahdo baahiyaha dadka naafada ah, iyadoo adkeynaysa joogtaynta, isla xisaabtanka, iyo horumarka joogtada ah ee hawlaha siyaasadda.

### 4.1 Istiraatiijiyadda Hirgelinta

i. Istaraatiijiyadda hirgelinta waxay diiradda saareysaa wada-shaqeyn dhinacyo badan leh, oo ay hirgelinayso Hay'adda Naafada Qaranka si kaalin mug leh ka qaadanayaan hay'adaha Dawladda, ururrada bulshada rayidka ah, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha caalamiga ahba.

ii. Dowladdu waxay mas'uul ka tahay dejinta Siyaasadda, bixinta maal-gelinta iyo isku-dubbaridka howlaha. Bulshada rayidka ah waxay hormuud u noqonaysaa u doodidda xuquuqda, ololeyaasha wacyigelinta iyo hirgelinta barnaamijyo ku siman heerkooda. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxay ka shaqeynayaan shaqo-

abuurka, horumarinta tiknoolojiyada iyo hagaajinta kaabayaasha nolosha, halka ay hay'adaha caalamiga ahi ku bixin doonaan khibrado farsamo.

iii. Siyaasadda waxaa loo hirgelinayaa si marxalado iyo wajiyo dhawr ah oo is-xig-xiga si loo beekhaamiyo cududda iyo karaanka hay'adaha ku hawlan fulinteeda:

- Ujeeddooyinka Muddada Dhaw, waxay xoogga saarayaan hirgelinta waxyaabaha mudnaanta kowaad leh ee baahiyaha asaasiga ah sida dhisidda iyo dib-u-habeynta kaabayaasho dhismo, ololayaasha wacyigelineed iyo dhisidda karaanka ee haya'daha qeybta ka ah fulinta Siyaasaddan.

- Ujeeddooyinka Muddada Dhexe, waxay xoogga saarayaan hirgelinta tababarka xirfadeed, waxbarasho loo dhanyahay iyo shabakadaha taageerada buslshada.

- Ujeeddooyinka Muddada Dheer wuxuu hadafkoodu yahay in si buuxda loo dhaqan-geliyo dhammaan heerarka caalamiga ah ee xuquqda naafada Soomaaliyeed iyo abuurista bulsho u siman adeegyadeeda.

**4.2 Ka-qeyb-galka Daneeyayaasha Siyaasadda**

- Inay naafadu qeyb ka noqoto hirgelinta Siyaasadda waa udub-dhexaadka guusha Siyaaaddan, waana in naafadu qeyb ka ahaataa qorshayaasha hirgelinta, go'aan-qaadashada iyo qiimeynta Siyaasadda, si naafadu u hubiso in waayo-aragnimadooda nololeed ay hoggaamiso hirgelinta Siyaasadda. Waxaan rajo wayn laga qabaa in codkooda la maqlo oo aragtiyadoodana lagu daro dhammaan heerarka hirgelinta, metelaadda ay ku leeyihiin golayaasha siyaasadda, latalinta, guddiyada hagidda, iyo hay'adaha maamulka.

- Iskaashiga lala yeelanayo dhinacyada muhiimka ah, gaar ahaan wasaaradaha Dowladda, ayaa lagama-maarmaan u ah dhisidda qaab-dhismeed mideysan oo lagu xaqiijinayo ka-mid noqoshada bulshada ee naafada.
  - **Wasaaradda Caafimaadka** waxay kaalin mug leh ka qaadaneysaa dadaallada lagu hubinayo hirgelinta adeegyo caafimaad ee loo dhanyahay oo dadka naafada ah qeyb ka yihiin.
  - **Wasaaradda Waxbarashada** waxay diiradda saaraysaa abuuridda waxbarasho oo ay naafadu ka faa'iidaysan karaan oo heer walba leh.
  - **Wasaaradda Shaqada** waxay horumarinaysaa barnaamijyo lagu dhiirrigelinayo shaqo-abuurka dadka naafada ah.
  - **Wasaaradda Howlaha Guud** waxay dejinaysaa halbeegyada heerarka lagama-maarmaanka u ah helitaanka kaabayaasha dhismo ay naafadu adeegsan karto.

- **Wasaaradda Warfaafinta** waxay door muhiim ah ka qaadanaysaa hirgelinta Siyaasaddan iyo Sharciga Ilaalinta Xuquuqda Naafada Soomaaliyeed, iyadoo ku wacyigelinaysa bulshada si loo xoojiyo aragtida wanaagsan ee ku saabsan dadka naafada ah.
- **Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka** waxay mas'uul ka noqonaysaa barnaamijyada caddaaladda, iyadoo hubinaysa in xuquuqda dadka naafada ah lagu ilaaliyo sharciga, nidaamyada garsoorkana la waafajiyo baahiyahooda, iyadoo sidoo kale la dabaqayo tallaabooyinka ka-hortagaya takoorka.

Habkan wadajirka ah wuxuu xaqiijinayaa in baahiyaha dadka naafada ah laga tix-geliyo dhammaan heerarka qorsheynta iyo hirgelintaba.

- Hay'adda Naafada Qaranka waxay ka shaqeynaysaa kor-u-qaadidda xuquuqda dadka naafada ah iyo u doodidda ama u qareemidda xuquuqdooda, la-shaqeynta Hay'adaha Dowladda iyo Ururrada Bulshada, si ay u fuliyaan ololayaasha wacyigelinta, isla markaana u fududeyso hirgelinta barnaamijyada Siyaasadda.

- Iskaashiga Dawladda iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay wuxuu caawinayaa in la xalliyo caqabadaha dhaqaale iyo kuwa aqooneed. Shirkadaha gaarka loo leeyahay waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay shaqaaleysiiyaan dadka naafada ah, bixiyaanna tababarro xirfadeed, isla markaasna horumariyaan qalab kaalmo naafo oo la awoodi karo iyo kaabayaal dhismo loo heli karo. Bulshada ayaa si firfircoon uga qaybqaadan doonta, iyadoo la adeegsanayo culimada diinta iyo odayaasha dhaqanka, si loo dhiirrigeliyo ka-qeyb-galka naafada ee arrimaha bulshada.

## 5. Kormeerka iyo Qiimeynta

Si loo xaqiijiyo in siyaasaddan loo fuliyay si hufan iyo in xal waara loo helo caqabadaha jira ee ay qabaan dadka naafada ah, Hay'adda Naafada Qaranka waxay hubinaysaa in dhaqaalihii loogu talo-galay adeegyada naafada si sax ah loo dhaqan-geliyay, iyadoo Wasaaradda la siinayo Warbixin joogta ah, Hababkani wuxuu dejinayaan tilmaamo cad iyo nidaamyo kormeer oo xooggan, sidoo kale, waxa ay suurta-gelinaysaa in siyaasaddan si buuxda uga jawaabayso baahiyaha dadka naafada ah, iyadoo sidoo kale la waafajinayo ballanqaadyada Qaranka iyo kuwa caalamiga ah.

### 5.1 Dejinta Tilmaamayaasha Qiimeynta Horumarka

Wasaaradda Qoyska iyadoo taageeraysa Hay'adda Naafada Qaranka ee u xilsaaran fulinta shaqadan, waxay dejinaysaa tilmaamo dhammeystiran si loo qiimeeyo horumarka qeybaha kala duwan ee Siyasaadda:

1. **Waxbarashada:** Tilmaamayaashu waxay la soconayaan hadba inta iskuulladu ay ka fuliyeen hannaanka waxbarashada loo dhanyahay, qalabka iyo kaabayaasha naafadu u baahantahay iyo sidoo kale diiwaangelinta, kuwa ka hara

waxbarashada iyo qalinjabinta ardayda naafada ah ee dhammaan heerarka kala duwan ee waxbarashada.

2. **Daryeelka Caafimaad:** waxaa la qiimeyn doonaa sida naafadu ay ku heli karto xarumo caafimaad, sida loo diyaariyay marinnada gaadiidka naafadu isticmaalaan, wiishashka hadba meelaha looga maarmi waayo, qeybinta adeegyada caawiyo naafada. waxaa kale oo la eegayaa sida loo diyaariyay xarumo takhasusi ah oo bixiya adeeg caafimaad sida barnaamijyada taageerada maskaxeed.
3. **Shaqaaleysiinta:** Hay'addu waxay diiwaangelineysaa dadka naafada ah ee ka shaqeeya hay'adaha Dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay. Waxaa tixraac iyo diiwaangelin loo sameynayaa si loo qiimeeyo waxtarkooda tababarrada xirfadeed iyo barnaamijyada shaqaaleysiinta.
4. **Ilaalinta Bulshada:** Hay'addu waxay qiimeynayaa sida naafadu u helaan lacagta hawlgabka, barnaamijyada kaalmada dhaqaale, iyo nidaamyada gargaarka degdegga ah. Sidoo kale, waxaa la qiimeyn doonaa saameynta ay hababkaas ilaalinta ah ku leeyihiin yareynta nuglaanta dhaqaale.
5. **Marin-u-helidda dadka Naafada ah:** waxaa la qiimeyn doonaa hadba inta dhismayaasha Dowladda, nidaamyada gaadiidka, iyo aaladaha dijitaalka ah ay u buuxiyaan heerarka loo asteeyay marin-u-helidda dadka naafada ah. Sidoo kale waxaa la qiimeynayaa horumarka laga sameeyay dib-u-habeynta kaabayaasha jira.

Xogta ayaa loo kala saari doonaa iyadoo lagu saleynayo nooca naafanimada, jinsiga, da'da, goobta juqraafiyeed, iyo heerka dhaqan-dhaqaale, si loo ogaado kala duwanaanshaha jira loona xalliyo farqiga sinnaanta. Xog ururinta muddada dheer waxay sahlaysa la socodka saamaynta mustaqbalka fog, halka ku darista xogtan ee nidaamyada Qaranka, sida Qorshaha Isbeddelka Qaranka ee 2025-2029 iyo Ujeeddooyinka Horumarka Waara (SDGs), ay xaqiijin doonto qorsheyn dhameystiran iyo isku-dubarid sax ah.

### 5.2 Abuurista Habab Isla-xisaabtan iyo Warbixineed

- Qaab-hawleedka isla-xisaabtanka ayaa wuxuu caddeynayaa waajibaadka wasaaradaha, hay'adaha Dawladda iyo daneeyayaasha, si loo xaqiijiyo isla-xisaabtanka marxalad kasta oo la fulinayo. Hay'adda Naafada Qaranka oo kaashanaya guddi hawleedka wasaaradaha, hay'adaha Dawladda iyo Wasaaradda Qoyska, waxay kormeeraysaa horumarka iyo fulinta u hoggaansanaanta Siyaasadda. Guddi-hawleedka wuxuu Hay'adda Naafada u soo gudbin doonaa warbixinno horumarineed oo waqtiyaysan oo si faahfaahsan u qeexaya guulaha, caqabadaha iyo isticmaalka kheyraadka, waxayna Hay'addu ka

diyaarinaysaa warbixin dhammeystiran oo si daahfuran dadka loola wadaagi karo, iyadoo warbixin joogta ah ka siineysa Wasiirka Wasaaradda Qoyska.

- Habraacyo jawaab-celin ah iyo qiimeyn bulsho ayey Hay'adda Naafada sameynaysaa sida khadad taleefan (hotlines), barnaamijyo moobil oo leh astaamo u fududeynaya isticmaalka dadka naafada ah iyo warbixinno bulshadu udub-dhexaad u tahay oo ay soo gudbinayaan ururrada naafada, iyadoo la kaashaneysa Wasaaradda Qoyska.

- Si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta, waxaa la dhiirrigelinayaa cidda si heer sare ah u fulisay Siyaasadda oo qaadda taallaabooyin naafadu qeyb ka tahay, halka ciddii jabisa shuruucda naafada taageeraysa ama fulin wayda heerarka loo xaddiday adeegyada si naafadu uga faa'iidaysato in la marsiin doono ciqaabta ku habboon si waafaqsan sharciga.

### 5.3 Wacyi galinta dadweynaha iyo Hufnaanta

- Hay'adda Naafada Qaranka waxay soo saareysaa warbixin-sannadeed ku saabsan hirgelinta Siyaasadda Qaran ee Naafada, taasoo muujineysa horumarka, caqabadaha iyo mudnaanta mustaqbalka. Warbixinta waxaa lagu daabacayaa qaabab la wada fahmi karo, sida farta Braille-ka, cajalado maqal ah iyo muuqaallo ku baxaya luqadda tilmaanta ee dadka maqalka la', si looga wada faa'iidaysto. Ololayaasha warbaahintu waxay dadka kula socodsiinayaan horumarka siyaasadda waxayna u dabaaldegayaan sheekooyinka guusha ee naafada si kor loogu qaado wacyiga bulshada ee ku aaddan naafada.

- Dejinta nidaamyo kormeer, qiimeyn iyo isla-xisaabtan oo dhammeystiran waxay xaqiijinayaan in Siyaasaddu ku guulaysato ujeeddooyinkeeda isla markaasna ay xaqiijiso baahiyaha isbedbeddalaya ee naafada. Soomaaliya waxay dhisi kartaa kalsooni, waxay kobcin kartaa dahfurnaan haddii ay qeexdo tilmaamo cad oo lagu qiimeeyo fulinta siyaasadda iyo nidaamyo kormeer iyo isla-xisaabtan oo lagula socoda hirgelinta siyaasadda. Tallaabooyinkan waxay qeyb ka noqonayaan helidda bulsho loo wada dhanyahay dadkeedu u simanyihiin adeegyada.

## 6. Maalgelin iyo Qoondeyn Dhaqaale

Waxaa lagama maarmaan ah in loo qoondeeyo Siyaasadda Naafada Qaranka Soomaaliya dhaqaale kufilan fulinteeda. Arrinkan ayaa looga jeedaa in la xaqiijiyo hirgalinta siyaasadan iyadoo la taaba-galinayo dhammaan baahiyaha gaarka ah ee uu tilmaamayo sharciga Naafada ee ku aaddan dadka naafada ah.

### 6.1 Xaqiijinta Qoondaynta Miisaaniyad ku filan

- Miisaaniyadda Qaranka waa in lagu daraa qoondada Sanduuqa Horumarinta Arrimaha naafada sida ku cad Qodobka 10aad faqraddiisa 2aad ee Sharci Lr. 29 ee soo baxay 02/12/2024, kaasoo loogu talo-galay sanduuqaas in loo isticmaalo horumarinta barnaamijyada waxbarashada, daryeelka caafimaadka, shaqaaleysiinta iyo ka-qeyb-galka naafada ee adeegyada bulshada. Sidoo kale, Hay'adaha kala duwan ee qeybta ka ah fulinta Siyaasaddan waxay miisaaniyadahooda ku darayaan qeyb ay ugu talagalayaan hirgelinta siyaasaddan. Si lacagahaas loogu bixiyo xaaladaha deg-degga ah sida xilliyada musiibooyinka, colaadaha iyo dhibaatooyinka dhaqaale ay jiraan.

### 6.2 Abaabulka Kheyraadka Maxalliga ah

- Bulshada Soomaaliyeed waxaa lagu dhiirrigelinayaa inay qeyb ka noqdaan barnaamijyada naafada iyagoo noqonaya shaqaale samafal, deeq-bixiyeyaal iyo inay qeyb ka noqdaan dadaallada iyo hal-abuurrada kheyraad wadaagga ah. Maalgelinta bulshadeed ee lagu taageerayo naafada waxaa lagu hawlgelinayaa mashaariicda yar-yar ee naafada. sidoo kale waxaa la abaabulayaa qurbajoogta Soomaaliyeed oo qeyb ka noqonaya ololayaasha lacag-ururuinta lagu maalgelinayo naafada.

### 6.3 Gunaanad

Siyaasadda Qaranka ee Naafada waa tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhisidda bulsho loo wada dhan yahay, halkaas oo qof kasta, iyadoon loo eegin awooddiisa, uu fursad u heli karo inuu ka qeyb-qaato horumarka Qaranka. Siyaasaddan waxay xaqiijineysaa ilaalinta xuquuqda, karaammada, iyo ka-qaybgalka dadka naafada ah horumarka Dalka, iyadoo xoogga la saarayo meelaha muhiimka ah sida helitaanka adeegyada, caafimaadka, waxbarashada, ka-qaybgalka siyaasadda, iyo caddaaladda. Waxay sidoo kale la jaanqaadaysaa heerarka iyo dadaallada caalamiga ah ee kor loogu qaadayo ka-qeyb-galka dadka naafada ah ee adeegyada iyo horumarka bulshada.

Guusha siyaasaddani waxay ku xirantahay wada-shaqeynta dhammaan daneeyayaasha, sida hay'adaha Dowladda, ururrada bulshada rayidka ah, Rugta-ganacsiga , hay'adaha caalamiga ah, iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay. Dawladdu waxay ballanqaadaysaa ilaalinta xuquuqda dadka naafada ah, ka-hortagga takoorka iyo bixinta adeegyada loo baahan yahay si loo xaqiijiyo dhisidda barnaamijyo horumarineed oo ay naafadu qeyb ka tahay. Hay'adaha bulshada iyo ururrada dadka naafada ah ayaa door muhiim ah ka qaadanaya wacyigelinta, kormeerka, iyo dhiirrigelinta ka-qayb-galka. Ganacsatada iyo deeq-bixiyeyaasha Soomaaliyeed waxay udub-dhexaad u yihiin barnaamijyada iyo dadaallada lagu hirgelinayo Siyaasaddan.

Bulshada Soomaaliyeed waa inay ka hortagto takoorka, taageertana dadka naafada ah, oo door muuqda ayka qaadato dhismaha bulsho ku saleysan sinnaan iyo wadajir. Siyaasaddan waxay ujeeddadeedu tahay in bulshada Soomaaliyeed noqoto mid qof kasta u oggolaanaysa fursad uu ku horumaro oo uu door ugu yeesho horumarka Qarankiisa.